

Die Anhörung im Asylverfahren – somali Übersetzung

Wareysiga Nidaamak Magan-Galyo Doonka

Tallo Bixin Loogu Tallo Galay Dadka Magan-Galyo Doonka Ah Ee Jarmalka Yimaada

Unabhängige Asylverfahrensberatung finden Sie an diesen Orten in Bielefeld:

- Unterkunft „Oldentruper Hof“, Niedernholz 2, Bielefeld
- Unterkunft „Hotel Südring“, Gütersloher Str. 259, Bielefeld
- Zentrale Ausländerbehörde (ZAB), Am Stadtholz 26, Bielefeld

You find independent consultation on the asylum process in the EAE Bielefeld here:

- Camp „Oldentruper Hof“, Niedernholz 2, Bielefeld
- Camp „Hotel Südring“, Gütersloher Str. 259, Bielefeld
- Zentrale Ausländerbehörde (ZAB), Am Stadtholz 26

Sie können mit diesen Personen sprechen: / You can talk with:



**Deutsches
Rotes
Kreuz**

Richard Reifengerst, 0163/7400353 (Südring/ZAB)

Olga Lakizuk, 0178/9090486 (Hotel Südring)



Johanna Hermann, 0521/546515-62 (Hotel Südring)

Ari Faizy, 0521/546515-64 (Hotel Südring)

Sophia Stockmann, 0521/546515-63 (Oldentruper Hof/ZAB)



Pia Villasenor, 0521 / 23828916 (Oldentruper Hof)




**Fachdienste Migration
und Integration**

Johanna Kellner, 0521/20899902 (Oldentruper Hof/ZAB)



Wareysiga Nidaamka Magan-galyo Doonka.

Tallo Bixin Loogu Tallo Galay Dadka Magan-Galyo Doonka Ah Ee Jarmalka Yimaada.



Qoraalkan waa mid aan kula jeceleysanay inaan kugu siino tallo ku aadan Wareysiga (Interview) Magan-galyo doonka.

Wareysigu waxaa arrinta ugu muhiim san ee aad ku dooneyo Magangalyo doonka.


Wareysiga lagula yeesho Hayadaha Qaxootiga Qaabilsan ee Jarmalku waxay

go,aan ka qaadan doontaa wareysiga lagula yeeshay inaad Jarmalka ku noolaato iyo In kale,waxaana la qiim eynayaa wareysiga lagula yeeshay. Waxaa haboon inaad tahay qof u diyaarsan ama iska soo diyaariyey wareysiga lagula yeelan doono.

Inta aadan marin Wareysiga (Interfuyuuga) waxaa haboon inaad u tago Looyar ama Haya'daha Qaabilsan la tallinta dadka Magangalyo doonka ah. Wadanka Jarmalka waxaa laga helaa Ururo aan dawli ahayn kuwaas oo xor ah isla markaasna si lacag la,aan ah ula taliya dadka Magangalyo doonka ah.

Ururadda & Hay'adaha Madaxa Banaan ee Caawiya Qaxootiga am a dadka Magangalyo doonka waxaad ka helaysaa Magaalo Kasta oo weyn Kuna Taal Magaalooinka Jarmalka, xataa Waa Laga helaa Tuulooyinka.

Gudbinta Codsiga Magan-Galyo Doonka




Waxaad Codsigaaga Magan-galyo u gudbin kartaa laanta kasta oo ah Xafiiska Federaalka Ee Socdaalka & Qaxootiga ee Dawladda Jarmalka. (Federal Office for Migration and Refugees)

(Bundesamt für Migration und Flüchtlinge = BAMF). Hadii aad isku daydo inaad ka codsato Magan-galyo Hay'ado kale oo dawladda ka tirsan sida Booliska,Maamulka Laanta Degaanka aad joogto,Am a Xafiiska Qaabilsan ajaanibta IWM, Waxaa lagu soo diri doonaa Xafiiska Federaalka Socdaalka iyo Qaxootiga oo ku shaqo leh arrim aha Magan-galyo doonka.

Waxaa muhiim ah inaad tagto laanta xafiiska Federaalka socdaalka & arrim aha Qaxootiga. Hadii aadan sidaas sameyn oo aadan tagin Xafiiska qaabilسان arrim aha qaxootiga,waxaa laga yabaa in wax ka si noqdaan codsigaaga Magan-galyo doonnimada.

Xafiiska Federaalka ee arrim aha qaxootiga markaad tagto waxaa lagu waydiin doonaa inaad faahfaahin ka bixiso shaqsiyadaada,waxa laga qaadi doono sawiro, Faro. Markaas ka dib waad diwaan gashan tahay,waana lagu diwaan galiyey. Waxaa suurogal ah in lagu waydiyo 25 su,aal oo ku saabsan naftaada ama shaqsiyaadada,sida wadanka aad u dhalatey, eheladaada & qaabkii aad ku tim id Wadanka Jarmalka. Jawaabaha aad bixiso oo dhan waad la diwaan galinayaa,waana la xafidayaa,waxaana dhici doonta in dib lagu waydiyo Wareysiga weyn xilliga lagula yeelan doono (Interfiyuuga).



Intaas ka dib waxa lagu siinayaa Aqoonsi Horudhac ah
Aufenthaltsgestattung)
 kaaso sidoo kale ah
 Aqoonsi. Aqoonsigan lagu siinayo waad inaad mar kasta wadataa.
 Aqoonsigan lagu siiyey

waxaa uu ku ogolanayaa inaad sii joogto meesha lagu dejiyey. Hadii laga bedelo meesha aad degan tahay,waa inaad Xafiiska Federaalka ku wargelisaa Addresska ama cinwaanka cusub ee lagu dejiyey ama lagu raray.Waa Sharci inaad Xafiiska Federaalka arrintaasi wargelisa.

Sidoo kale haddi aad leedahay Looyer ama ay jiraan ururo ku caawiya waa inaad iyagana u sheegtaa meesha cusub ee lagu raray si ay kula soo xiriiraan xaaladadaana ula socdaan.

Waxaa muhiim ah inaad xiriir la sam eyn Safaaradda Wadanka aad u dhalatay am a cid kasta oo wakiil ka ah dalka aad u dhalatey,waa hadii Maamulka Jarmalku ku waydiisto inaad saas sameyso,Marnaba xiriir hala sameyn safaarada wadankaga ee ku taal Jarmalka. Waxaa inta badan dhacda in Maamulka Jarmalku dadka Magan galyo doonka ah ay waydiyaan inay Basaboor ama dukum enti ka soo qaataan safaarada ay ka soo jeedaan ee Jarmalka ku taal,taasina waxay sababi kartaa in deg deg lagu masaafuliyo hadii aad Basaboor ama dukum enti kale ka keento Safaarada dalkaga ee ku taal Jarmalka. Ha yeelin hana aqbalin inaad saas sameyso. Hadii laga codsado sidaas fadlan la xariir Looyer ama Ha'yadaha caawiya qaxootiga ee ku sugar Magaalada aad degan tahay.

Yaa Xaq U Leh Ilaalin Ama Magan-galyo ?

Xafiiska Nidaamka Magangalyo doonka ayaa baareya in lagugu cadaadiyey Wadankaagi Hooyo & hadii aad ku laabato in dhibaato ku soo gaareyo. Cadaadiska oo dhan waxay ku lug leeyihii xadgudubyo ka dhan ah nolosha bini aadamka sida Xoriyad darro, Isir Naceyb, Dhalasho, Diin, koox gaar ah & arrimo siyaasadeed iyadoo lagu cadaadiyo. Cadaadisku waxaa uu horseedi karaa arrimo khatar ah oo bulshada lagaga dhex takooro.

Cadaadiska waxa fulin kara Hay'addo dawladeeda, Hay'adaha aan dawliga ahayn, Xisbi Siyaasadeed, Kooxo fallaago ah, Ururo diimeed, Bulshada degaanka, Xubnaha Qoyskaaga iyo Shaqsiyaad kale. Haddi ay ku soo gaareen Cadaadiska noocan ahi waxaa laga ayaabaa in Xafiiska Federaalka ee baareysa arrintaad inay ilaaliyaan xaquuqdaada.

Sidoo kale Xafiiska Federaalka waxaa uu baarayaa haddi aad ku laabato wadankaaga halista kugu imaan karta Iyo sidoo kale dhibaatooyinka caafim aad darro, Xoriyadda Darro. Muhiim adu sidoo kale waa suaal inaad heli karto Ilaalin degaan kale oo ah wadankaagi.

Sidoo kale garashada sharciga qaxootiga waxaa lagu xukumi karin. Wadam o badan oo Yurub ah oo uu ku jiro jarmalku ayaa heshiis ku gaaray in hal wadan Qaabilo Magan galyo doonka, taas macnaheeda waa in Wadanka ugu soo horeya ee qofka Magan galyo doonka ahi ka codsado Magan galyo uu isagu qaadayo dacwadiisa Magangalyo doonim o. Waxaana Codsigaaga Magan galyo doon ka masuul ah wadankii kugu horeyey ee aad timid.

Hadii aad wadan kale oo Yurub ah soo martey isla markaasna Farro lagaga soo qaaday, waxaa arrintaada Masuul ka ah wadankii aad soo martey taasna macnaheedu waa inaysan Jarmalka am a wadan kale oo Yurub ahi uusan arrintaada Magan galyo go, aansan karin.

Arrintan hadii ay jirto oo aad wadan kale soo martey la xariiri Looyer am a Hay'adaha Tallo Siinta u qaabilsan Magan galyo doonka.

Hadii aad wadan kale oo Yurub ah Farro ku leedahay am a Magan Galyo hore soo waydiisatey, waxaa wada xiriiraya Dawladda Jarmalka iyo Wadankii aad hore u soo martey, waxaana ay ka wada hadlayaan qaabkii dib lagugu celin lahaa wadankii kowaad ee aad soo martey. Markaas waxa haboon inaad si deg deg ah ula xiriirto Looyer am a Hay'adaha Qaxootiga caawiya.

Wareysiga Xafiiska Federaalka (Interfiyuuga)

Qof shaqaale ka ah xafiiska federaalka dawladda Jarmalka ayaa kula yeelan doona wareysiga (Interfiyuuga). Codsigaaga Magan galyo doonnim ada waxaa lagi tiixgalin doonaa wareysiga lagula yeelan doono. Tani sidoo kale waxay dhaceysaa haddi aad hore codsi magan galyo u waydiisatey Maamul kale tusaale xarun Boolis & xeryaha qaxootiga. Wuxaad aad ku tiraahdo Xafiiska Federaalka waa Muhiim inaad xasuusanaato. Wareysiga am a Interfuuyuga waxaa lagula yeelanaya dhawr maalmood ka dib markaad gudbisato codsigaaga Magan galyo doonnim adda. Sidoo kale waxaa dhici karta in Wareysiga lagula yeelan karaa uu dib u dhaco dhawr maalmood am a waqt dheer qaato.

Wareysiga marka lagula yeelanayo waxaa lagu soo diri doonaa warqad balan oo sheegeysa xilliga aad Wareysiga am a Interfuuyuga mareyso, waxaana lagugu soo diri doonaa Boos ("Anhörung gemäß § 25 Asylverfahrensgesetz") waxaana soo diraya xafiiska



federaalka ee arrim aha qaxootiga qaabilsan.

Haddii aadan hubin inaad xilliga lagula balamay aadan imaan karin,fadlan wargali xafiiska ay khuseyso arrintani maalmo ka hor una sheeg sababta aadan u imaan karin xilligaas si dib lagugu dhigo Wareysiga Ama Interfuyuuga. Haddi aad xanuunsan tahay Dhaqtarka ka soo qaad warqad cadaynaya inaad waqtigaas xanuunsaneyd oo aadan tagi karin xafiiska wareysiga lagula yeelan lahaa. Sidoo kale Xafiiska arrintaas khuseyso waydii wixii tallo ah ee ku aadan inaad imaan karin waqtiga loogu tallo galay.

Dhanka kale Interfiyuuga ama wareysiga lagula yeelanayaa waa Fursad qaali ah inaad ku sheegto sababaha aad u codsaneysyo Magan galyadda. Sidoo kale waxaa muhiim ku ah inaad u soo diyaar garowdo Wareysiga lagula yeelanayo adigoo diyaarsana aad tim aado goobta Interfiyuuga. Isku day inaad xasuuusnaato Xaqiqda iyo warbixinaha aad sheegan doonto ee aad ku dooneysyo in lagugu qaabilo. Waa Muhiim inaad si wanaagsan iskaga soo xafido ama diyaarsato dhamaan wixii aad sheegi lahayd marka la gaaro Interfiyuuga waqtigiisa.

Waa muhiim inaad diyaarsanataa wixii aad ku hadli lahayd oo run ahina ku diyaarsan yihiin. Inaad diyaarsanaato oo ku hadasho xaqiqda waxay ka caawineysaa inaad maskaxdaada dib u celiso xasuuusatana wax kasta oo kugu soo dhacay. Inaad Maskaxda ku xafidaa dhibkii kugu soo dhacay balse maahan inaad warqad ku soo qorto oo la timaado xafiiska Wareysiga lagula yeelanayo,haddi taasi dhacdana waxaa loo arkayaa in qof kale warbixintan kula soo diyaariyey,balse waxaa haboon inaad maskaxdaada iyo xasuuusataada kaashato korna ka sheegto wixii dhib kugu soo dhacay. Waxaa muhiim ah inaad xasuuusato dhacdooyinkii foosha xumaa iyo dhibkii lagu geystay una sheegto

xafiiska qaabilsan arrimaha
qaxootiga marka Wareysiga ama
interfiyuuga lagula yeelanayo.



Haddi aad tahay haweenay oo
aadan awoodin inaad
xadgudubyadii lagu geystey kala
hadasho nin,tusaale ahaan ninka
interfiyuuga qaadaya

Waxaa jira haween ka hawlgala
Xafiiska Federaalka oo loo
tababaray inay wareystaan
haweenka isla markaasna aad u
sheegan karto dhib kasta oo kugu
dhacay. Sidoo kale waxaa jira
shaqaale loo tababaray inay
wareystaan Caruurta, haweenka &
dadka dhibaato Maskaxda ka
dhacday sida Stress (Trauma) taas
oo ay sabab u tahay waayo-
aragnimo xum o.

Sidoo kale waxaa lagu ogol yahay inaad soo kaxaysato qof aad ku kalsoon tahay si uu
xaadir u noqdo wareysiga lagula yeelanayo uuna ku turjumo,balse waxaa ka horeysa
inaad xafiiska federaalka ku wargeliso arrintaasi sida ugu dhaqsaha badan. Waa Arrin
waxtar leh

hadii qofka aad hesho uu ku hadlo Luuqada Jarmalka lyo sidoo kale Luuqadaada hooyo si uu kugu turjumo. Qofkan waa Turjubaan aad u soo bandhigeyso sababaha aad u codsaneysyo magangalyadda,waxaana uu u gudbinayaa qofka wareysiga ka qaadaya,waana turjubaan idin dhexeya labadiina,waxaana uu gudbinaya waxaad aad ku hadasho adigu.

Turjubaanku waxaa uu xaadir ka ahaanayaa waqtiga iyo goobta interfiyuuga lagu gula yeelanayo. Wargali xafiiska federaalka luuqada aad jeceshahay in wareysiga lagugula yeesho oo aad si fiican ugu hadli karto.


Fadlan hubso inaad timaado waqtiga Interfiyuuga lagula yeelanayo saacadana waa inaad ilaalisa. Haddi aad hayso wax cadeynaya dhibaatadii iyo cadaadiiskii aad kala kulantey dalkaagi hooyo hore u soo qaad sida dukumenti,Joornaal,warqadaha cadeynaya inaad xabsi ku jirtey iyo wixii la mid la mid ah. Hadii aad hayso warqadahaas si deg deg ah koobi u sii Xafiiska Federaalka ee wareysiga kula yeelanaya.

Sidoo kale hadii aad cadeymahaas kaga timid dalkii hooyo oo ay awoodaan inay qaraabadaadu ama saaxibadda ku soo diri karaan u sheeg ama wargali Xafiiska Federaalka in warqadaha cadeynta ah lagu soo diirayo. Wixii cadeymo ah waxay muhiim u yihiin codsigaga magan galyo doonimo.

Waligaa ha gudbin wixii dukumentiyo been abuur ah. Wixii Dukumenti been abuur ah oo lagugu helo waxay saameyn (dhibaato) ku yeelanayaan codsigaaga Magan galyo doonnimmo.

Turjubaanku waa inuu gudbiyaa wixii aad sheegto oo faahfaahsan. Turjubaanku hawsha kaliya uu u joogo meesha waa inuu wax kasta oo aad tiraahdo turjumaa isla markaasna u gudbiyaa qofka ka socda xafiiska federaalka ee wareysiga kula yeelanaya. Turjubaanku waa inuu si sax ah u gudbiyaa wax kasta oo aad tiraahdo adiga uu kugu soo gudbiyaa su,aal kasta oo lagu waydiyo.

Hadii aad dareento inuusan Turjubaanku wixii aad tiri si sax ah ugu gudbin qofka su,aalaha ku waydiinaya ee Xafiiska Federaalka ka socda, fadlan la socodsii qofka Interfiyuuga kula yeelanaya una sheeg inaadan ku qanacsaneyn Turjubaankan,Waxaadna codsataa Turjubaan kale. Hubi kiis kasta oo diidmo waa la duubay ama la kaydiyey.



Wareysigu sida caadiga ah waxaa uu ka bilaabmaa 25 su,aallood. Su,aalahsan waxay ka bilaaban doontaa shaqsiyadaada sida ninkaaga,naagtaadda, caruurgaada, waalidiintaada,

ayeeyooyinkaa, cinwaankaga iyo shaqaadada lyo sidoo kale sidii aad ku timid wadanka Jarmalka.

Hadii su,aalahan lagu waydiiyey markii aad magan galyo doonka ahayd ee lagu diwaan galinayey,waxaa dhici karta in iyagoo faahfaahsan qofka shaqaalaha ahi ku waydiyo. Shaqaaluhu su,aalaha uu ku waydiyo ka jawaab adigoo hubinaya inaad fahansan tahay. Waydii qofka shaqaalaha inuu ku soo celiyo su,aasha hadii aadan marka hore fahm in ka codso inuu mar labaad kugu soo celiyo. Hubi in jawaabaha aad waraysiga ku bixisay inay u dhigm aan kuwii xarunta soo-dhowaynta.

Hadii aadan dal kale ka soo galin wadanka Jarmalka,waa inaad qeexdaa sidii aad ku timid halkan. Hadii aad wadanka Jarmalka Diyaarad ku timid waa inaad keentaa cadeyn ku aadan tigitkii aad diyaradaha ku soo raacday ama Boarding pass-kii aad isna diyaaradda ku soo raacday,waa inaad xafiiska federaalka u dhiibtaa cadeymahaas. Intaas ka dib waxaa lagu siin doonaa fursad aad ku sheegto sababtii aad uga timid wadankaagii hooyo. Waa inaad si sax ah u qeexo cadaadiiskii aad uga timid dalkaagi sida Jirdil,Xabsi,iyo wixii la mid ah, lyo wixii kale oo cadeymo ah oo ku aadan cadaadiiskii dalkagii aad uga t imid. Tani waxay xoojineysaa in shaqaalaha ku wareysanayaa ay aaminaan waxa aad sheegeyso. Sidoo kale qeex ama cadee waxyaabaha kula kulmi karra hadii dib aad ugu noqoto ama lagugu celiyo wadankaagi aad ka soo carartey.

Ha Sharixin xaalada guud ee siyaasadeed ee dalkaaga ilaa adiga lagu waydiyo inaad sharaxdo.

Arrinta ugu muhiim san waa inaad sheegto am a sharaxdo arrintada ku aadan codsigaaga magangalyo adigoo aan ka leex leexaneyn. Ha iska hadlin,laakiin ka jawaab su,aalaha lagu waydiinayo mawduuc kalena ha galin. Ogsoonow wax aan cadeyn hadii aad ka hadasho waxay kharibeysaa ama khalad loo fahmayaa marka la turjum ayo.


Waxaa dhacda in dadka magan galyo doonka ahi ay sheegaan sheekooyin hore ay u sheegeen dad kale,taasi oo sababta inaysan macquul ahayn in sheekadaasi isla markaas la duufsaday am a qof hore sheegtey,waxaana dhici karta in shaqaalaha xafiiska federaalku aysan rum eysan hadaladaada qaarkood. Markaas waxaa haboon inaad ka hadasho runta iyo wixii kugu soo dhacay oo run ah balse aan ahayn sheeko laysla soo dhisay.

Haddi aad ka cabanayso caafim aad darro aad kala timid dalkaagi am a waxba lagaga qaban kari waayey wadankii aad timid u sheeg shaqaalaha xafiiska federaalka. Marmarka qaarka waxaa dhacda in Shaqaalaha xafiisku ku waydiyaan su,aalo la xiiriira Kiiskaaga sidaas darteed waa inaad adigu xadido inaad ka jawaabti su,aalaha isla markaasna faahfaahiso.

Inta Wareysiga lagula leeyahay qaado waqtii hana ogolaan cadaadiin,hana joojin wareysiga hadii lagu cadaadiyo inaad joojiso. Ha yeelin cadaadin ku aadan in waqtii yar lagu siiyo am a interfiyuuga lagugu soo koobo adigoo aan dham eysan una sheeg inaadan dham eysan wareysigii. Hadii aad rabto u sheeg maalin kale qabso kuna wargali inuusan wareysigaagu kugu fileyn.

Hadii waqtiga Interfiyuuga aad ku qanacsan tahay,waxaa la duubayaa wixii aad ku hadashay oo dhan, kana codso in lagugu soo celiyo dhamaan wixii aad ku hadashay iskana hubi in wixi aad ku hadashay oo dhan ay sax yihiin isla markaasan sidii aad tiri

loo duubay. Hadii meelo qaldan yihii u sheeg inaysan sax ahayn oo ka codso in dib loo saxo. Iskana hubi in dib loo saxay wixii qaldamay.



Dhamaadka Interfiyuuga waxaa lagu waydiin doonaa inaad ku qanacsan tahay wareysiga siduu u dhacay, waxaana laga saxeexaya warqad, hadii aad ku qanacsan tahay isla markaasna aad dib u dhageysatey dhamaan wixii aad ku hadashay am a kalsooni ku qabtid wareysiga lagula yeeshay inuu sax yahay waa inaad saxeexdaa. Balse hadii aadan ku qanacsaneyn wareysigii laga qaaday oo aad cadaadis kala kulantey qofkii

interfiyuuga qaaday am a Turjubaanka, waxaad ku wargelineysaa inaadan saxeexeyn isla markaasna ka codso balan dambe iyo waqtii dambe oo interfiyuugii cusub ah. Sidoo kale xafiisak Federaalka, Looyer hadii aad leeyahay iyo ururada dadka caawiya ku wargali in interfiyuugii laga qaaday aadan ku qanacsaneyn. Hadii aadan Qareen lahayn ka codso xafiiska qaxootiga in laga saxo wixii ka qaldamay. Hadii aad waxaas oo dhan ku qanacsan tahay, saxeexda warqada isla markaasna Shaqaalaha Interfiyuuga ka qaadaya ka codso Koobi ka mid ah interfiyuugii lagula yeeshay.

Koobiga wixii aad ku hadashay waxaa lagugu soo diraya Boos, waxaana ku soo diraya xafiiska Federaalka ee wareysiga kula yeeshay.



Go,aanka Xafiiska Federaalka

Waxaad heleysaa jawaabta go,aankii Xafiiska Federaalka ee arrim aha qaxootiga qaabilسان oo qoraal ah, waana jawaabtii wareysigii lagula yeeshay. Sidaas darteed m arkaad interfiyuuga am a wareysiga marto waa inaad maalin kasta hubisa Boostadda si aad u ogaato

inay wax jawaab ahi ku timid, hadii aadan boos lahayn waxaa lagugu dhiibaya xafiiska m eesha aad degan tahay ku yaal ee lagaa Maamulo (**Aufnahmeeinrichtung**).

Dhinaca kale hadii aad Qareen Xafiiska Federaalka waxaa uu go,aankaga u dirayaan Qareenka Kiiskaga ka masuulka ah, sidaas darteed isku day inaad markasta la xiriirto Qareenkaga si aad ula socoto hawshaadu meesha ay mareyso iyo hadii wax jawaab ah uu kaga hayo Xafiiska Federaalka.

Hadii codsigaagii Magangalyo doonnim o la soo diidey (Ablehnung) waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato go,aanka Maxkam adda. Xaaladan oo kale wawaad haysataa waqtii kooban oo aad racfaan kaga qaadato. Hadii go,aanka kaga yim i Xafiiska federaalka ama Maxkam adda uu yahay Diidm o **"manifestly unfounded"** ("offensichtlich unbegründet") , waa inaad qoraal jawaab celin ah oo deg deg ah u qortaa Maxkam adda asbuuc gudihiis taas oo macnaheedu yahay inaad racfaan ka qaadatey Diidm adii lagu siiyey.

Diidm adda (Reject) lagu siiyey wawaad xaq u leedahay inaad laba asbuuc racfaan kaga qaadato,sidaas darteed isla marka aad hesho Diidmada waa inaad u tagtaa Qareen ama meelaha lagula taliyo dadka Magan galyo doonka ah am a Qaxootiga si deg deg ah si xaaladda wax looga qabto,xitaa hadii ay macquul tahay maalinta aad hesho jawaabta Diidmada ah waa inaad sida ugu haboon u raadisa Qareen am a Xafiisyada qaabiilsan arrim aha qaxootiga ee ku yaal magaalada am a Tuuladda aad degan tahay.

Hadii diidmada lagu siiyey ay tahay Mamnuuc **inadmissible**"("unzulässig") or **"irrelevant"** ("unbeachtlich") ,taasi waxay ka dhigantaa inuusan Jarmalku codsigaaga Magan galyo sii wadin karin iyadoo laga yaabo inaad wadanka Kale oo ka tirsan Yurub (European State) aad soo martey isla markaasna ay Macquul tahay in wadankaasi uu arrintaada Magan galyo doon la wareego.

Xaalada noocan oo kale waxay keenysaa go,aankaga lagu wareejiyo wadankii aad ka timid ee markii hore aad qaxootiga waydiisatey. Wadankaas ayaa xaq u leh inaad waydiisato Magangalyo. Wawaad isku daydaa inta aadan ku laaban wadankii hore ee aad soo martey

inaad xarum aha Qaxootiga qaabilsan ee jarmalka ku yaal wixii tallo ah waydiisato. Xarrum aha Qaxootiga caawiya ee ku yaal wadanka Jarmalka waxaa loogu tallo galay inay caawiyaan qaxootiga markaas waa inaad waydiisa wixii tallo ah ee ku aadan kiiskaga intii aadan ku laaban wadankii hore ee aad Magangalyada waydiisatey.

